Paid Leave Oregon

# CAYMISKA DADKA ISKOOD U SHAQEESTA

Barnaamij cusub oo u ogolaanaya shaqaalaha Oregon in ay qaataan fasaxa mushaaraysan qaar ka mid ah waqtiyada nolosha ugu muhiimsan ee saameeya qoysaskeena, caafimaadka iyo badqabkeena.

## Dadka iskood u shaqeesta miyay ku jiraan Fasaxa mushaaraysan ee Oregon?

Dadka dakhli ka hela oo iskood u shaqeesta, oo ay ku jiraan qandaraaslayaalsha madax-banaan, waxay dooran karaan in ay ka qayb qaataan barnaamijka fasaxa mushaaraysan iyagoo iska diiwaangelinaya caymiska iyo bixinta qaaraanka. Ma bixinayaan caymis hadii aysan is diiwaangelin.

## Miyaa la ii tixgalinayaa qof iskiis u shaqeesta hadii aan ahay ganacsade?

Waxay kuxirantahay sida aad adigu mushaar u qaadato. Hadii aad faa'iido ka hesho ganacsigaaga aad isu tixgaliso qof iskiis u shaqeestaa oo canshuur bixiya ah, markaas adigaa iskaa u shaqeesta oo dooran kara in aad ka qaybgasho barnaamijka fasaxa mushaaraysan hadii aad rabto.Hadii aad tahay shaqaale ka tirsan meheradaada oo aad hesho jeegaga mushaarka ee aad galiso W2, markaas waxaad tahay shaqaale heesta caymis Fasaxa mushaaraysan ee Oregon.

## Hadii aan qayb ka noqdo Caymiska Fasaxa mushaaraysan ee Oregon, goormaan isdiiwaan gelin karaa?

Dadka iskood u shaqeesta ayaa iska diiwaan gelin kara ceymiska fasaxa mushaaraysan ee Oregon laga bilaabo 1-da bisha janaayo sanadka 2023.

## Waa maxay shuruudaha lagu dooranayo caymiska?

Si aad u heshid caymiska Fasaxa mushaaraysan ee Oregon,qofka iskii u shaqeeysta waa in uu:

- $ Ugu yaraan helaa $1,000 dolar oo ah dakhliga la canshuuri karo kana helo iskaa u shaqeysiga sanadkii hore
- $ Buuxi/Dhamaystir ogeysiiska doorashadaada
- $ Keen koobiga canshuur celinta cadaynaya dakhliga kasoo galo iskaa u shaqeeysiga
- $ In aad bixiso tabarucaadka mudo sadex sano ah iyo in aad bixiso wixii macluumaad dheeraad ah sida uu kaa codsado Xaafiiska Bixinta fasaxa mushaaraysan ee Oregon

## Intee in la'eg oo taburucaad ah ayaa laga rabaa dadka iskood u shaqeysta in ay ka bixiyaan mushaarkooda?

Dadka iskood u shaqeesta waxay bixin doonaan taburucaada sadexdii biloodba mar. Heerka tabarucaadka hada ee caymiska dadka iskood u shaqesta waa 0.6% dakhliga sanadlaha ah ee la canshuuri karo, ilaa ugu badnaan dakhli dhan $132,900. Tusaale ahaan, qofka shaqeeyo $60,000 sanadkii iskiisana u shaqesta ayaa bixin doona wax aan ka badneyn $90 sadaxdii biloodba mar.

## Waa maxay faa'iidooyinka laga helo Fasaxa mushaaraysan ee Oregon?

Caymiska waxaa la helaa 12 todobaad oo fasaxa mushaaraysan sanadkii, iyo laba todobaad oo dheeraad ah oo fasax la xiriira uurka. Shaqaale badan ayaa heli doona 100% mushaarkooda oo la beddelay. Qadarka faa'idada ee la bixiyay waxay ku salaysan tahay celceliska dakhligaaga ee sanadkii tagay. Qadarka ugu yar ee toddobaadlaha ah hada waa $61, iyo qaddarka ugu badan ee toddobaadlaha ah waa $1,469. Lacagta ugu yar iyo tan ugu badan waxay ku salaysan tahay celceliska mushaarka toddobaadlaha ee gobolka,taasoo la cusboonaysiiyo 1-da Julaayo ee sannad walbo.

## Faa'iidooyinka dadka iskood u shaqeeysta ma la mid yihiin kuwa shaqaalaha caadiga ah?

Haa.Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Fasaxa mushaaraysan ee Oregon iyo faa'iidooyinka waxaad ka heli kartaa onleen.

## Goorma ayay bilawdaan helida faa'idooyinka?

Faa'iidooyinka la bixiyo xiliga fasaxa ee Oregon waxay bilaavanaysaa 3-da bisha Sibteembar sanadka 2023.

## Qofka iskiis u shaqeeysta ma heli karaa faa'idiooyinka isla markiiba?

Dadka iskood u shaqeesta ee iska diiwaan galiyay Fasaxa mushaaraysan ee Oregon waxay xaq u leeyihiin in ay helaan cadadkooda faa'iidaada oo dhan ka dib markay bixiyaan qaaraanka muddo sanad ah. Waxay heli doonaan qadar faa'iido dhimis ah hadii ay bixinayeen qaaraanka wax ka yar hal sano. Inta badan, qofku waa inuu lahaado caymis ugu yaraan rubuc si uu xaq ugu yeesho faa'iidooyinka qaarkood. Tusaale ahaan, si ay xaq ugu yeeshaan faa'iidooyinka qayb ahaan Sibteembar 2023, dadka iskood u shaqeesta waxay u baahan yihiin in ay is diiwaangeliyaan dhammaadka bisha juun ee2023 oo ay bixiyaan tabarucaad ugu yaraan dakhli dhan $1,000 dolar inta u dhaxaysa markay is-diiwaangeliyaan iyo 30-ka juun 2023.

## Waa maxay shuruudaha looga baahan yahay qofka iskiis u shaqeesta ee isu diiwan galiyo caymiska?

Dadka iskood u shaqeysta ee iska diiwaan galiyay caymiska fasaxa mushaaraysan waa in ay:

- $ Bixiyaan qaaraanka sadexdii biloodba mee ama kabadan;
- $ Ka warbixiyaan dakhligooda oo ay keenaan nuqul ka mid ah canshuur celintooda 30—ka bisha abriil ee sannad kasta.

## Intee in la'eg ayay qaadanaysaa ballanqaadka caymiska fasaxa mushaaraysan?

Qofka iskii u shaqeesta ee isu diiwaangeliyay ceymiska fasaxa mushaaraysan waa in uu ogolaadaa in uu bixiyo qaaraanka ugu yaraan sadex sano.

## Ma ka bixi karaa caymiska ikhtiyaariga ah?

Sadexda sano ee ugu horreysa, qofka iskii u shaqeesta wuxuu kansali karaa fasaxiisa mushaariga ah hadii uusan markaas iskiis u shaqaynin ama uu fayl-gareeyay musalafnimo/Musalafay. Sadex sano oo caymis ah ka dib, waxay burin/kansali karaan caymiskan wakhti kasta.

## Qof iskiis u shaqeesta isla markaana meel kale ka shaqeeya ma iska diiwan galin karaa caymiskan? Haa.Dakhliga ay iskood u shaqeesta, qofka ayaa iska bixin kara qaaraanka. Dhanka kale qofka uu u shaqeeyo ayaa ka jari doona tabarucaadka jeegooda mushaarka. Dabadeedna, hadii ay u baahan yihiin fasax mushaari ah, cadadkooda faa'iidada waxay ku salaysnaan doontaa labada dakhli iyo mushaharkooda ay iskood u shaqeystaan.